



MAGAALADA SAINT PAUL – RUGTA GACAN QABADKA GANACSIYADA

651-266-6600

BusinessResources@ci.stpaul.mn.us

Marka aad la soo xiriirto rugta gargaarida ganacsiyada, shaqaalaha hor u marinta ganacsiyadu waxa ay kugu caawin doonaan



Mashruuca u Fidinta Gargaarada Dhaqaale Ganacsiyada Saint Paul

BARNAAMIJYADACASRIYEYNTA CANSHUURTA (STAR)

XIDIG Xaafadeed (STAR)
Waa deeqo iyo amaaho lagu maal geliyo ganacsiyada. Cidii rabta - ganacsato ama hay'ad sama-falba waa ay codsan kartaa deeqdaa ama amaahdaa hadii ay codsi soo gudbiyaan iyagoo raacaya habraaca u tartamida deeqaha. Deeqahu inta badan waxa ay u dhexeeyaan \$5,000 ilaa iyo \$200,000.

XIDIG Dhaqameedka (STAR)
Waxa uu dhaliyaa kobcin dhaqaale iyagoo gargaara qaybaha iyo xarumaha fanka iyo dhaqanka. Ururada fanka ee sama-falka ah iyo ganacsiyada magaalada ku dhex yaalba xaq bay u leeyihiin in ay codsadaan deeqahaa ama amaahahaa sanadkiiba hal mar. Deeqdu waxa ay u dhexeysaa \$5,000 ilaa iyo \$50,000.

DEEQAHA GOBOLKA IYO KUWA NAWAAXIGA
Sanad walba Magaalada Saint Paul waxa ay u gudbisaa codsiyada deeqda Gobolka iyo Met Council iyagoo sii mariya qolyo kale si loo dhameystiro mashruuca. Deeqahaasi waxa ay maal galiyaan mashaariicda horumarinta ee nadaafada, baarida, gaadiidka dadweynaha, naqshadaha iyo guryadaha dowlada.

MAAL GELINTA XEELADA KU DHEEHAN
Waa mashruuc bixiya amaahyo la cafiyo marka dambe si loo caawiyo ganacsiyada u soo wareegaya Saint Paul. Amaahda la siinayaa ganacsiyadaa inta ay le'eg tahay waxa ay ku xiran tahay inta shaqo ee uu ganacsigaasi abuurto waana laga cafiyaa ganacsiyada amaahda hadii sharuudo ka soo baxo.

MASHRUUCA AMAAHDA DULSAARTA 2% AH
Magaaladu iyada oo kaashanaysa Bankiyada deegaanka ayey Waxa ay bixisaa amaahyo gaaraya \$25,000 oo dul saarteedu tahay boqolkiiba 2% si ay u caawiso ganacsiyada xaafadaha ee tafaariqda, ama adeegyada ama warshadaha yar yar ah.

MASHRUUCA GOOBAHA GACANSIGA EE BANAAN
Waxaa loogu tala galay in goobaha ganacsiga ahaan jiray ee banaan dib u hebeyn loogu sameeyo, mashruucu waxa uu siiyaa ganacsadata iyo mulkiileyaasha guryahaa amaah gaaraysa \$25,000.

MAAL-GELINTA KALE
Magaalada Saint. Paul waxa ay heli kartaa khayraadyo kale si ugu fidiso gargaar dhaqaale mashaariic badan oo kala duwan oo hor u marin ama dib u habeyn ah waxaana ka mid ah mashaariicdaa Deeqda Hor marinta Beesha (CDBG), Canshuur Ka Yareynta (TIF), curaar siin iyo ilo kale oo khayraad.